# *Gafka Cadaaladeed ee Kiiska Cawo ku Jira*

## *Maxkamadda Racfaanka iyo ta Gobalku Waxa ay Xukun Xabsi ah ku Rideen Shan Wiil oo Dhallinyaro ah oo Lagu Eedeeyey Kufsi Wadareed Iyada oo aan Loohayn Wax Caddayn ah*

**30 December 2020**

6-dii December 2020, Maxkamadda Racfaanka ee Maroodi-jeex, ee fadhigeedu yahay Hargeysa, Somaliland, waxa ay xukun saddex sanno iyo afar billood oo xabsi ah ku riday shan wiil oo dhallinyaro ah. Wiilasha, oo ku noolaa Xarrunta Agoomaha ee Hargeysa, da'doodana lagu sheegay inta u dhaxaysa 15-16 sanno, waxa lagu helay danbiga ah in ay caawinayeen laba eedaysane oo kale si ay u gaystaan kufsi-wadareed ka dhan ahaa gabadh dhallinyar ah oo ku noolayd Xarrunta Agoomaha, Cawo Xariir Raage.

Illaa markii la ogaaday dhibaatada Cawo billawgii May 2020, *Hay'adda Horizon* waxa ay ka taageereen qoyskeeda sidii ay u heli lahaayeen caddaalad. Taageeradaa waxa kamid ahaa dedaalka loo galay in la baadho sidii iyo sababtii maamulka Xarrunta Agoomaha Hargeysa ay u ilaalin waayeen Cawo iyo sababta Wasaaradaha Xukuumadda ee ka masuulka ah Xarrunta Agoomaha iyo daryeelka carruurta, Laanta Danbi-baadhista (CID) ay ugu guul-darraystee. intaa wixii ka danbeeyey. Cawo waxa ay u adkaysatay dhibaato aan la sawiran karayn oo ayna ahayn abid in ilma carrruur ahi uu maro. Cawo waxa ay nasiib ku lahayd in ay haysatay Aabbo, Xariir Raage, kaas oo diiday in cunfiga loo geystay inantiisu bilaa ciqaab uu ku dhammaado, isla markaana ku adkaystay in Xarrunta Agoomuhu ka jawaabto dayacaadda sababay in gabadhaa yar ee maskiinta ahi ee daryeelkooda ku hoos jirtay ay uur qaado.

Cawo iyo qoyskeedu waxa ay u baahan yihiin una qalmaan caddaalad. Waa masuuliyadda CID-da, xeer-illaalinta, uu matalo Xeer-ilaaliyaha Guud iyo maxkamaduhu in ay geed dheer iyo mid gaabanba u koraan sidii danbiilayaashii runta ahaa loo aqoonsan lahaa, si sax ah loo xukumi lahaa maxkamadna loo hor keeni lahaa. Nasiib-darro, arrintani may dhicin. CID-du may samayn baadhis dhab ah oo ballaadhan, taas oo ay adkaatay in kuwii dhabta ahaa in la xukumo. Xeer-illaalinta ayaa u soo jeedisay eedaymo shantan eedaysane oo ayna caddayn u hayn.

6th Floor Omar Hashi Building, Hargeisa, Somaliland | +252 523 603 +252 (0) 633 751 063
P.O. Box 691-00621 Nairobi, Kenya | +254 (0) 20 4180 222 +254 (0) 713 773 420
www.thehorizoninstitute.org | info@thehorizoninstitute.org

Maxkamadda Racfaanka ee Maroodi-jeex ayaa ku riday xukun xabsi iyada oo aan u hayn caddayn sugan oo taageeraysa xukunka. Cadhadii dadweynaha iyo dalabyadii xukunku waxa ka dhashay in si sharciga ku khaldan loo ciqaabo caruurtii nuglayd ee aan haysan cid difaacda.

Marka laga yimaado khaladka xukunka Maxkamadda Racfaanka, xeer-illaalintu waxa ay hadda raadinayaan in Maxkamadda Sare ku riddo xukun intaa ka sii dheer eedaysaneyaasha. Xorriyadda iyo mustaqbalkii shantaa wiil ee carruurta ah waa in aan loo sadqayn sawirka ah, in arrintii halkaa ku dhammaatay, maadaama Cawo ay caddaalad heshay. May helin caddaalad. Sidoo kale may helin caddaalad wiilashaa soo dhadhamiyey qadhaadhka Nolosha markii qoyskoodu ay waayeen fursad kale oo aan ka ahayn in ay geeyaan Xarrunta Agoomaha. Faqrigooda iyo awood la'aantooda waa in aan hadda loo adeegsan in ay noqdaan wankii lagu sadqaynayey fashilka hay'adihii shaqadoodu ay ahayd in ay illaaliyaan iyaga.

Qareenkii ay magacawday *Hay'adda Horizon* si uu u matalo shantaa wiil waxa uu sidoo kale racfaan ka qaatay go'aanka. Waxa uu codsanayaa in Maxkamadda Sare ay laasho go'aankii Maxkamadda Racfaanka iyo in ay amarto in si dhakhso ah loo sii daayo.

## Waa maxay Sababta Go'aanada Maxkamadda Racfaanka iyo Gobolku ay Qalad u yihiin

*Maxkamadda Gobolka, October 2020*

October 2020, todoba wiil, oo dhammaantood ku nool Xarrunta Agoomaha Hargeysa ayaa la hor keenay Maxkamadda Gobolka ee Maroodi-jeex. Waqtigaas, waxa muddo dhawr billood ah lagu hayey Xarrunta Laanta Danbi-baadhista (CID) kadib markii lagu soo eedeeyey in Cawo Xariir Raage, oo sidoo kale ku noolayd Xarrunta Agoomaha la faraxumeeyey. Xeer-illaalintu waxa ay dacwad ku soo oogtay dhammaan eedaysaneyaasha in ay gaysteen kufsi wadareed iyaga oo u cuskaday Qodobka 398 ee Xeerka Ciqaabta. Xeer-illaalintu way sheegi kari waayeen waqtigii saxda ahaa ee kufsiga la gaystay waxayna qiyaas ahaan ka cabbir-qaateen uurkii dhibanta.

Codsi ka yimid xeer-illaalinta, Cawo oo da'deedu ahayd 15, waxa July baadhay saddex dhakhtar oo ka tirsan Cisbitaalka Guud ee Hargeysa si ay u qiimeeyaan garaadkeeda. 3 August 2020, waxa ay saxeexeen warqad ku cabbiraysa garaadka Cawo in uu u dhigmo ilmo 6 jir ah, taas oo ka dhigan in ayna suurtagal ahayn in ay bixiso go'aanka ka raali noqoshada falka.

Eedaysaneyaasha 1 iyo 2 ayaa qirtay in ay galmo la sameeyeen dhibanaha, balse way dafireen in ay kufsadeen. Shanta eedaysane ee kale waxa ay dhaar ku mareen in ayna marnaba dhicin in ay wax galmo ah la sameeyeen dhibanaha, ayna arag danbigaas oo dhacaya ama ay ogayn danbigaas oo la geysanayo.Waxa ay qireen in Eedaysanaha 1 uu ka codsaday in ay ugu yeedhaan Cawo dhawr jeer, balse ayna garanayn sababta uu u doonayo.

Xeer-illaalintu waxa ay keeneen 4 qof oo ay ku taageerayaan doodooda ka dhana eedaysaneyaasha. Saddex kamid ah afarta markhaati waxa ay qayb ka ahaayeen maamulka Xarrunta Agoomaha ka afraadna waxa uu ahaa isla baadhihii dacwada. Dhammaantood waxa ay xuseen in ayna goobjoog u ahayn markii uu dhacayey falka kufsiga ee loo geystay Cawo. Taas lidkeed, marka la eego markhaatigooga, kufsi la geystay ma jiro. Balse waxa ay xuseen in Cawo u sheegtay in falka kufsigu ahaa mid ay dhawr qof raali iskaga ahaayeen, weedhaas oo ay tahay in la laalo maadaama natiijadii caafimaadku sheegtay in cawo ayna awood u lahayn in ay bixiso ogolaansho ama ay fahanto wixii dhacayey, xaqiiqadaas oo muuqatay markii lala kulmay Cawo. Xogtii ay bixiyeen afarta markhaati gebi ahaanba waxa ay ku salaysnayd kutiri-kuteen. Ma buuxinayaan shuruudihii Xeerka Ciqaabta iyo Xeerka Habka Ciqaabta taas oo ah in markhaatigu bixiyo xog uu u soo joogay kuna salaysan wixii ay indhahooda ku arkeen.

Xeer-illaalintu sidoo kale 3 August 2020 waxa ay soo saareen warqad ay saxeexeen saddex dhakhtar oo ka tirsan Cisbitaalka Guud ee Hargeysa.

Iyada oo lagu sallaynayo xogtan aadka u daciifka ah, shantii wiil ee aan qiran danbiga, kuwaas oo aan la soo bandhigin caddeyn in ay geysteen wax danbi ah waxa lagu xukumay 6 billood oo xadhig ah taas oo ayna jirin sharci loo cuskadaa. Maadaama wiilasha lagu hayey xarrunta CID-da muddo 6 billood ah, waxa la filayey in la sii daayo xukunkana waxa loo arkayey mid iska muunad ah oo lagu qancinayo cabashada dadweynaha iyada oo aan la sii gaadhsiin ciqaab dheeraad ah. Eedaysanihii 1 iyo 2, oo danbiga qirtay, waxa lagu xukumay saddex sanno.

Balse xeer-illaalintu markiiba way ka hor yimaadeen natiijadii waxayna la tageen Maxkamadda Racfaanka si dhammaan eedaysaneyaasha loogu xukumo muddo intaa ka dheer.

*Qaladaadkii Xeer-illaalinta*

Ka hor inta aan kiiska loo gudbin maxkamadda, Xeerka Ciqaabta Somaliland, oo lamid ah xeerka laga isticmaalo adduunka oo dhan, waxa uu ka dalbanayaa xeer-illaalinta in ay soo saaraan caddeynta loo baahan yahay si: (1) Loo xaqiijiyo in danbi dhacay iyo (2) in eedaysaneyaashu yihiin kuwii geystay danbiga. Haddii mid kamid ah qodobadani maqan yahay, xeer-illaalintu waa in ay codsataa baadhis dheeraad ah ama in la xidho kiiska cadayn la'aan awgeed.

Xeer-illaaliyihii loo xilsaaray kiiskani muu raacin nidaamkii caadiga ahaa. Muu bixin wax caddyn ah oo muujinaya in danbiga kufsi wadareedku dhacay ama in eedaysaneyaashan todobada ahi ay dhammaantood si toos ah ugu lug lahaayeen. Wixii ay soo bandhigtay xeer-illaalintu waxa uu ahaa qiraal ay sameeyeen laba kamid ah eedaysaneyaashu taas oo aan waxba ka khusayn shanta kale.

Inkasta oo Hay'adda Horizon shaki xoog ah ka qabto xukunka ka dhanka ah labada eedaysane ee qirtay in ay ku lug lahaayeen kiiska Cawo ayna qorshaynayso in dib-u-eegis

lagu sameeyo kiiskooda kadib marka daraasad dheeraad ah la sameeyo, warbixintani waxa ay diiradda saareysaa shanta wiil ee sida joogto ah u soo bandhigayey in ay bilaa danbi yihiin.

*Qaladaadkii Maxkamadda*

Maxkamaduhu waa udub-dhexaadka nidaamkasta oo caddaaladeed. Maxkamaduhu waa goobta ugu danbaysa ee rag, haween iyo carruurtuba adduunka oo dhan ay ka raadsadaan caddaalad iyo in lagu saxo qaladaadkii ka dhacay booliska iyo xeer-illaalinta. Maadaama ay yihiin garsoorka ugu danbeeya ee caddaaladda, waxa muhiim ah in ay maamulaan maxkamadaha garsooreyaal ay ka go'an tahay, awoodna u leh in ay fuliyaan masuuliyadda culus ee garbahooda la saaray.

October 2020, Maxkamadda Gobolka Maroodi-jeex kamay soo bixin waajibaadkeedii. Maxkamaddu waxay xukunka ridi kari lahayd oo kaliya haddii lagu qancay danbiga ay soo oogeen xeer-illaalintu, oo ah kufsi wadareedka sida ku xusan Qodobka 398 ee Xeerka Ciqaabta, in si shaki la'aan ah ay shanta eedaysane u geysteen danbiga. Kiiska ka dhanka ah shanta eedaysane oo sheegay inaanay danbi galin waxa ay ahayd in la laalo maadaama aan la hayn wax caddeyn ah sida uu dhigayo Qodobka 115 ee Xeerka Habka Ciqaabta. Balse maxkamaddu sidaa umay dhaqmin. Sidoo kale waxa ay diiday codsigii qareenkooda ee ahaa in la sii daayo maadaama aan la soo bandhigin wax caddeyn u ah danbigooda.

Maadaama markhaatigii xeer-illaalintu gebi ahaantiiba uu ku salaysnaa kutiri-kuteen, Maxkamaddu waxa ay ahayd in ay laasho markhaatiga sida ku cad Qodobka 184 (a) ee isla xeerkaas. Balse tana may samayn. Waxay ahayd in danbiga lagu waayo. Halkii sidaa laga yeeli lahaa, shanti wiil waxa lagu riday xukun xabsi oo 6 billood ah, kaas oo aan lahayn aas-aas sharci maadaama wax caddeyn ah aan la hor keenin maxkamadda. Maxkamaddu, taas baddelkeeda waxa ay cuskatay Qodobada Xeerka (109 iyo 40) kuwaas oo aan soo rogeyn wax ciqaab ah.

Eedaysaneyaashii 1 iyo 2 waxa lagu helay danbiga kufsi wadareedka waxana lagu xukumay saddex sanno oo xabsi ah.
Xeer-illaalintii kumay qancin waxayna si dhakhso ah uga codsadeen Maxkamadda Racfaanku in ay dib-u-eegis ku samayso xukunka.

## *Maxkamadda Racfaanka, December 2020*

*Xukunka ay ka dhasheen Su'aalaha badan*

Intii lagu guda jiray dacwadda Maxkamadda Racfaanka ee Maroodi-jeex, xeer-illaalintu may soo bandhigin caddeyn cusub. Iyaga oo cuskanaya xaqiiqooyinkii hore ee ay jeediyeen markhaatigu, Maxkamaddu 6 December 2020, waxa ay kordhisay xukunkii Eedaysanaha 1 iyo 2 oo ay ka dhigtay 8 sanno, iyada oo ku sababaynaysa in ay gaysteen kufsi wadareed. Sidoo kale waxa ay kordhisay mudadii xukunka 5-tii eedaysane oo ahaa 6 billood kana dhigtay saddex sanno iyo afar billood.

Marka loo eego shanta wiil, waa dariiq cusub oo ay qaadatay Maxkamaddu iyada oo ku doodaysa in Qodobka 398 aan lagu caddeyn 5-ta wiil, balse ay galeen danbiga ah "Gacan-siin danbi" sida ku xusan Qodobka 298 ee Xeerka Ciqaabta. Maxkamaddu may soo bandhigin wax caddeyn ah habayaraatee oo xoojinaysa eedaynta cusub.

Qirasho la yaab leh oo calaamad su'aal saareysa gebi ahaanba xukunka, Maxkamadda lafteeda ayaa qirtay in ay dhab ahaantii jiraan dad illaa hadda maqan oo ay tahay in la baadho, taas oo hoosta ka xarriiqaysa qodobkii ay Cawo qoyskeedu sida cad ugu celcelinayeen warbaahinta. Faqradda 8, bogga 18, Maxkamaddu waxa ay qortay: *"Waxa kale oo Maxkamadda Rafcaanka U Cadaatay Inay Jiraan Eedaysanayaal Aanay Baadhis Ku soo Samayn Boolisku Lana Soo Eedayn Oo Aana Lagu Soo Darin Xaashida Eeda Iyo Warka Hore Ee Dacwada, Balse Maxkamaddu Cid Ma Eedayso Waxayna Go,Aan Ka Gaadhay Dacwada Hortaalay."*

Meelna laguma xusin sida "ay Maxkamadda ugu caddaatay" in ay jiraan dad kale oo lagu eedeeyey danbiga ka dhanka ah Cawo oo maqan kuwaas oo ayna boolisku baadhis ku samayn. Iyaga oo ka duulaya xogtan, Maxkamaddu waxay ahayd in ay laalaan kiiska ka dhanka ah *dhammaan* eedaysanayaasha. Sidoo kale waxay ahayd in lagu dhaleeceeyo CID-da iyo xeer-illaalinta shaqada liidata ee ay qabteen waxayna ahayd in ay u sheegto in ay dib u noqdaan kiiska iyo inay masuuliyaddooda si sax ah u soo gutaan.

*Hay'adda Horizon* waxa ay si adag u aaminsan tahay muhiimadda danta guud ee nidaamka caddaalad ciqaabeedka iyo in ay dadweynuhu xisaabiyaan shaqada xukuumadda oo ay ku jirto waaxda caddaaladdu. Habka ugu wanaagsan ee loola xisaabtami karo hay'adahaas waa in dadweynahaa ay u adeegayaan loo sheegaa shaqada ay hayaan, ayna dareemaan in ay awood u leeyihiin ayna daneeyaan la xisaabtanka hay'adahaas. Sidaa awgeed, indhaha dadka ee aadka ugu soo jeestay kiiska Cawo, oo aan hore u dhici jirin oo taabtay dadka reer Somaliland iyo goobo kaleba ku nool, waxay ahayd in la soo dhaweeyo.

Balse, xubnaha dadweynaha ee dalbanayey in ay Cawo caddaalad heshaa may rabin oo kaliya xukun la rido. Waxay rabeen in kuwii falkaa gaystay, dhammaantood, la baadho, la xidho, maxkamadda sharciga ahna la hor keeno. Xukunka ay riday Maxkamadda Racfaanka ee Maroodi-jeex aad ayuu uga fog yahay wixii ay dadku xaqa u lahaayeen in ay arkaan. Waxa ay hadda doorkeedii tahay Maxkamadda Sare sidii ay u xaqiijin lahayd in Cawo hesho caddaaladdii ay u qalantay. Markay heshana, waxa aan shaki ku jirin in shanta will la bari yeeli doono, haddii aan la soo bandhigin caddeyn cusub oo lagu kalsoon yahay.

***Hay'adda Horizon waa Urur Maxalli ah oo ka hawlgala Somaliland kana shaqeeya sidii loo horumarin lahaa sarreynta sharciga iyo xuquuqal insaanka. Warbixinaha iyo daraasadaha aanu soo saarnaa waxa ay daah-furaan arrimaha taaggan ee lagu ogaaday shaqada aanu qabano. Waxa ay bixiyaan xog iyo gorfeyn loogu tallo galay in ay cariso doodda ka dhaxaysa daneeyeyaasha, dadweynaha iyo deeq-bixiyaasha iyo in ay kor u qaado siyaasadaha xukuumadda iyada oo lagu salaynayo qadarinta xuquuqal insaanka, sarraynta sharciga iyo dhiirigelinta isku filaanshaha.***

***Si aad wax badan uga ogaatid hawsha aanu qabano, fadlan booqo degalka internet-ka aanu ku leenahay ee www.thehorizoninstitute.org nagala socda Twitter @Horizon_SL iyo Facebook @HorizonInstituteSomaliland.***

***Wixii macluumaad dheeraad ah ee aad u baahan tahay, waxa aad nagala soo xidhiidhi kataa email-ka info@thehorizoninstitute.org.***